



25/07/2022

ACSOS2022

AQOONIS WEYDAARSIGA SANNADLAHA 9AAD EE CILMIBAARISTA SOOMAALIYEED

BAAQ QORAALLO & DOODO- CALL FOR PAPERS & PANELS

Waxaa sharaf noo ah inaan idinla socodsiinno in Aqoonisweydaarsiga Sannadlaha 9^{aad} ee Cilmibaarista Soomaaliyeed (The 9th Annual Conference on Somali Studies - ACSOS2022), la qabanayo **06-08 Diisambar 2022**; laguna qabanayo Muqdisho, Soomaaliya.

Sannadkan, aqoonisweydarsiga ACSOS2022 waxaa si wadajir ah u martigelinaya jaamacadaha kala ah: Jaamacadda Muqdisho & Jaamacadda Banaadir.

Aqoonisweydaarsiga Sannadlaha ee Cilmibaarista Soomaaliyeed (ACSOS), waxaa la bilaabay sannadkii 2014, ujeedkiisuna waa kobcinta dhaqanka cilmibaarista iyo in si cilmiyaysan loo lafaguro arrimaha Soomaalida iyo guud ahaanba Geeska Afrika. Waxaa si joogto ah u qabanqaabiya Machadka Cilmibaarista Soomaaliyeed (ISOS), oo kaashanaya jaamacadaha iyo xarumaha cilmibaarista.

Yaa ka soo Qaybgelaya?

Waxaa lagu martiqaadayaa dhammaanba aqoonyahannada, cilmibaarayaasha, macallimiinta Jaamacadaha iyo khubarada kaleba inay soo gudbiyaan qoraallo (papers/abstracts) iyo doodo (panels) ay kaga qaybgelayaan ACSOS2022; oo ku qoran mid ka mid ah luqadaha English, Carabi ama Soomaali.

Mawduucyada

Institute for Somali Studies - ISOS

Qoraallada iyo doodaha waxaa laga soo gudbin karaa mawduuc kasta oo ka hadlaya arrimaha Soomaalida, waxaana ka mid ah:

1. Afka, suugaanta iyo dhaqanka
Language/linguistics, literature and culture
2. Qoritaanka & hirgelinta far Soomaalida, iyo saamaynta ay ku yeelatay aqoonta
Adoption of the Somali script and its impact
3. Caafimaadka & Waxbarashada
Health & Education
4. Taariikhda, siyaasadda & maamulka
History, politics and governance

5. Khayraadka, deegaanka & abaaraha, & maaraynta masiibooyinka
Natural resources, environment & droughts, & risk management
6. Dhaqaalaha, horumarinta & maaraynta khayraadka
Economy, development & resource management
7. Bulshada, arrimaha haweenka & dhallinyarada
Society, women & youth issues
8. Bulshada rayidka, xuquuqda aadanaha iyo warbaahinta
Civil society, human rights and media
9. Qurbaha iyo qurbajoogta, tahriibka & barakacayaasha iwm
Diaspora, migration and IDPs

Hannaanka soo Jeedinta

- Muxaadaro/erayo khubaro lagu martiqaaday (keynote speeches)
- Soo jeedin cilmibaaris (paper presentation)
- Nadwooyin (panel discussion)

Fadhiyada qoraallada (*presentation sessions*) waxaa markiiba la soo bandhigayaa 2-3 qoraal oo mawduuc guud wadaaga. Qoraal kasta waxaa loo qoondeeyay 15-20 daqiiqo.

Fadhiyada aqoonwadaagga (*panel discussions*) waxaa doodda wadaagaya 3-4 qof.

Taariikhda iyo Habraaca

Mucda qoraalka ama doodda (abstracts) waxaa la soo gudbinayaa:

laga bilaabo **10 Oktoobar 2022**

ugu dambayn **10 Noofambar 2022**

Ku qoran barnaamijka **Microsoft Word**, ahna **200-400 eray**.

Luqadda qoraalku waa **English, Carabi ama Soomaali**.

Waxaa la soo raacinayaa **macluumaadka shakhsiga (biography)**

Waxaa lagu soo dirayaa emailka isos@mu.edu.so

Taariikhda ACSOS2022 waa **06-08 Diisambar 2022**.

Goobta lagu qabanayo **Muqdisho**.

Baraarujin

Waxaan boorinayaa in mucda qoraallada (abstracts) la sii dhamaystiro, lagana dhigo qoraallo buuxa (papers) oo la raacay halbeegga cilmibaarista. Machadka ISOS wuxuu u hawlgelayaa in la faafiyo qoraallada la soo dhamaystiro.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir isos@mu.edu.so

Waad mahadsan tihiin

Ka qaybqaado dhalinta aqoonta!
Be a part of knowledge production!